



## Truncus Arteriosus

Halbowlaha Wadnaha Halka Xidid



Ogeysiis:

### Wadne caadi ah



The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404  
612-813-8800 \* Toll Free: 1-800-938-0301 \* Fax: 612-813-8825  
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

---

## Halbowlaha Wadnaha Halka Xidid

### Truncus Arteriosus

Halbowlaha wadnaha halka xidid ah waa cillad lagu dhasho oo hal xidid dhiig halbowlaha oo naadir ah (halxididle) oo bixiya wareegga dhiiga ee habdhiska jirka, sambabbada, iyo halbowlaha. Halbowlaha sambabbada waxay ka soo baxaan halbowlaha weyn ee kor u socda. Waxaa jira hal dabool oo ah muruq ka kooban laba, saddex, ama afar liifadood. Badanaa waa hawlgab, oo waxaa ka soo noqda dhiigga (dhiig-daaadasho). Xuub weyn oo ku yaalla agagaarka ventricular septal defect (duleelka darbiga wadnaha ama VSD) ayaa xaaladaha oo dhan si toos ah uga hoos jirta daboolka dhiigga. Sidaas ayey isugu qasmayaan xididdada dhiigga ee sambabbada iyo jirka iyo cadaadiska ayaa isku mid ka noqonaya labada qalbac. Baaxadda pulmonary blood flow (qulqulka dhiigga sambabka ama PBF) waxaa go'aaminaya xajmiga halbowlaha sambabka. Haddii PBF ay tahay xad-dhaaf, congestive heart failure (wadnaha oo dhiigga soo saari waaya ama CHF) ayaa laga yaabaa in dhacdo culeyska xad-dhaafka ah ee qalbaca saaran awgiis. Haddii ay PBF yar yahay, ilmaha waxaa ka muuqan karta midabka oo aad u doorsooma (buluug) oo aan lahayn calaamado ah CHF.

Halbowlaha xawlmariidka badanaa caadi maahan. 30% waxaa lagu arkaa dhibaato ah qeybta sare ee halbowlaha 33% ilmuhu waxay qabaan xanuunka DiGeorge. Badanaa dhallaanku waxay la kulmaan midabka oo doorsooma ama calaamadaha CHF ilaa labada toddobaad ee ugu horreeya noloshooda haddii aan ka hor la ogaan. Halbowlaha wadnaha halka xidid waa in ka yar 1% ka mid ah cilladaha wadnaha ee lagu dhasho.

#### Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:

- Heerarka kala duwan ee midabka doorsooma iyo calaamadaha CHF ayaa badanaa la arkaa, sida naqaska oo ku dhega (neefsashada oo adkaata), wadne-garaac degdeg ah (garaaca wadnaha oo ah boobsiis), cunto xumo, iyo failure to thrive (korriinka oo ka xumaada ama FTT).
- Infakshan ku dhaca neefmareenka oo soo noqnoqda ayaa caadi ah.
- Waxaa lagu xirayaa garaaca xididka wadnaha iyadoo markaas neef loo qaatay garaacis awgeed.
- Wadnaha agagaarkiisa oo kacsan iyo dareen ah qeybta kore oo durugtay.
- Guux hore oo ah dhiigga hoose iyo dhiig soo daadanaya ayaa la maqli karaa. Marmar, guux, daran oo ah dhiigga kore VSD ayaa laga maqlayaa agagaarka xabadka dhiniciisa bidixe. Sharqan ah dhiigga kore ayaa laga maqli karaa figta iyo dhanka kore ee agagaarka xabadka iyo S2 hal ah. Haddii uu socodka dhiigga sambabka yahay xad dhaaf, wuxuu noqon karaa garaaca dhigga hoose oo waxaa wehelisa ama aan wehelineyn garaac boodis ah.

#### Cilladsheegid:

- Raajada Xabadka: Wadne-barar (wadnaha oo weynaada) iyo koror ah calaamadaha xididdada sambabka.
- EKG: Dhidibka QRS oo caadi ah. Unugweynaad ah labada qalbac ayaa lagu arkaa 70% ilmaha.
- Uultarasawanka wadnaha: Cilladsheegid.

#### Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:

- Antibiyootigga loo qaato qalliinka ilkaha ka hor ayaa ilmaha lagula talinayaa.
- Daawooyinka ka hortagga xinjirowga, sida kuwa biyaha saara (Lasix), ayaa badanaa lagu maareyn karaa calaamadaha qalliinka ka hor.
- Baarista hiddesideha waa in la sameeyo wax yar ka dib dhalashada sababtoo ah waxaa soo bixi kara xanuunka DiGeorge.
- Qalliinku badanaa waa toddobaadka koowaad ee nolosha ilmaha (eeg qalliinka Rastelli).
- La-socosho ah daaweynta wadnaha oo joogto ah ayaa khasab noqon doonta.
- Tuubagelinta ah buufinta ballaarinta ama qalabka la gelinayo qalbaca midig ee halbowlaha sambabka ama daboolka la gelinayo maqaarka hoostiisa ayaa loo baahan karaa mustaqbalka si loo kordhiyo dhiigga tuubooyinka.
- Qalliinka qalabka qalbaca midig ee dhuunta halbowlaha sambabka ayaa loogu baahan doonaa koritaanka caadiga ah ee ilmaha ama kaalsiyamta galeysa dhuunta.
- Dhaqaaqa badan ayaa loo diidi karaa; dhakhtar waa in uu soo oggolaado ciyaaraha isboortiska.